Puntland Highway Authority

# WARBIXINTA WAXQABADKA HAY'ADDA WADDOOYINKA DPL AFARTA BILOOD



**JUNE, JULEY, AUGUST IYO SEPTEMBER 2022**

**30 October, 2022**

**Hay’adda Wadooyinka DPL**

**Puntland Highway Authority**

# WARBIXINTA WAXBADKA HAY’ADDA EE AFARTA BILOOD AH , JUNE, JULEY, AUGUST IYO SEPTEMBER

| | | |
|---|---|---|
| <br>*Waddada laacdheere-Rabaable* | <br>*Wadada Jalam-Xaarxaar* | <br>*Xarig jarka wadada Garowe-Sanujiif* |
| <br>*Wadada Bursaalax-Galkacyo* | <br>*Wadada Xaajikhayr-Dalsan* | <br>*Wadada lafo-goroyo* |
| <br>*Dhagax dhiga wadada Sheerbi-Dhahar-Xingalool* | <br>*Sahanka wadada Garacad-Galkacyo* | <br>*Sahanka wadada Garowe-Garacad* |

## Table of Contents

HORDHAC:....................................................4

UJEEDDOOYINKA ISTARAATIIJIGA AH EE HAY'ADDA ....................................................4

WAXQABADKA HAY'ADDA BILAHA JUNE, JULY, AUGUST, IYO SEPTEMBER....................................................4

1. KOR U QAADIDA AWOODDA MAAMULKA IYO MAALIYADDA ....................................................4

1.1 WAXAAN DIB U HABAYN KU SAMAYNAY QAAB DHISMEEDKA HAY'ADDA .......................... 5
1.2 DAJINTA QORSHAYAASHA HAY'ADDA .......................... 5
1.3 DHISMAHA SYSTEMYADA MAAMULKA IYO MAALIYADDA .......................... 5
1.4 TAYADA MAAMULKA .......................... 6
1.5 DHISMAHA HABKA SHAQADA IYO SHAQAALAHA.......................... 6
1.6 DHISMAHA HABKA MAAMULKA HANTIDA HAY'ADDA .......................... 6
1.4 DHISMAHA XAFIISYADA IIBKA IYO KHASNAJIGA .......................... 7
1.5 HABKA KAYDINTA XOGAHA HAY'ADDA.......................... 7
1.6 SHAQO QEEXIS.......................... 7
1.8 DHISMAHA QUICK BOOK.......................... 7
1.9 DAYACTIRKA GOOBAHA SHAQADA.......................... 8
1.10 DAYACTIRKA GAADIIDKA.......................... 9
TABABARRADA SHAQAALAHA.......................... 9
1.11. TABABAR KU SAABSAN HOGAAMINTA (LEADERSHIP).......................... 10
1.12. TABABAR KU SAABSAN XIRIIRKA IYO TIKNOOLAJIYADDA (IT AND COMMUNICATION) .......................... 10
1.13. TABABAR KU SAABSAN HABKA MAAMULKA MASHAARIICDA .......................... 10

2. HORMARINTA QAYBAHA FARSAMADA, SAHANKA IYO DHISMAHA....................................................10

2.1 HORMARINTA HABKA MAAMULKA DAYACTIRKA .......................... 11
2.2 HORMARINTA QAYBTA INJINEERIN-KA HAY'ADDA .......................... 11
2.3 DAYACTIRKA QALABKA SAHAN.......................... 11
1.14 TABABAR KU SAABSAN BAARISTA CIIDDA.......................... 12

3. HORUMARINTA, DAYACTIRKA JIDADKA LAAMIGA IYO KUWA JIDCADAHA AH EE PUNTLAND, IYO KOR U QAADIDA AWOODDA MAAMULKA QANDRAASYADA HAY'ADDA PHA. ....................................................12

3.1 MASHRUUCA DHISMAHA WADADA LAACDHEERE-RABAABLE .......................... 12
3.2 MASHRUUCA DHISMAAH WADADA- XAARXAAR .......................... 13
3.3. MASHRUUCA DHISMAHA WADADA XAAJI KHAYR- DALSAN .......................... 14
3.4. MASHRUUCA DHISAMAHA WADADA BURSAALAX-GAALKACYO .......................... 14

**3.5. Mashruuca Dhismaha wadada Lafo-goroyo** ........ 15
**3.6. Mashruuca dhismaha wadada Sheerbi-Dhahar-XIngalool** ........ 15
**3.7 Mashruuca Sahanka wadada Wadaagsin** ........ 16
**3.8 Mashruuca Sahanka wadada Garoowe-Garacad** ........ 16
**3.9 Mashruuca Dayactir Wadada Garoowe-Sinujiif** ........ 16
**3.10. Mashruuca Dayactirka Xaajikhayr 2** ........ 17
**3.12. Mashruuca Dayactirka Xaaji-Khayr 1** ........ 17
**3.15. Mashruuca Dayactirka Waddada Rabaable-Birtadheer** ........ 18
**3.16. Mashruuca Dayacatirka Wadada Xarfo-Bacaadweyn** ........ 18
Maamulka Kormeerka iyo Dabagalka Mashaariicda ........ **18**
**3.17. Habka Maamulka Mashaariicda** ........ 19
**3.18. Kormeerka iyo dabagalka Mashaariicda** ........ 19
**3.19. Hubinta Tayada Mashaariicda** ........ 19
**3.20. Tayaynta Shaybaarka Hay'adda** ........ 19

**4. XOOJINTA XIRIIRKA HAY'ADDA EE DANEEYAASHA, DOWLADDA IYO DADWEYNAHA ........ 20**

**4.1. Samaynta Website-ka Hay'adda** ........ 20
**4.2. Dhismaha Baraha Bulshada** ........ 20
**4.3 Isticmaalka Warbaahinta Gudaha** ........ 21
**4.4 Kor u qaadida xiriirka Daneeyayaasha kala duwan** ........ 21

**HIRGELINTA QORSHAHA ISTIRAATIIJIGA AH EE SADDEXDA SANO ........ 21**

**7. GABO-GABO ........ 21**

## Hordhac:

Warbixinta waxqabadka hay'adda ee 4-ta bilood oo ah warbixin soo koobaysa waxqabadkii iyo guulihii ay hay'addu ka gaartay shaqooyinkii qorshaysnaa Afartii bilood ee lasoo dhaafay ee kala ah; (June, July, Agust, September), iyo kuwii aan qorshaha ku jirin balse lagu guulaystay in la qabto.

Warbixintan waxqabadka hay'adda ee sadexda bilood ayaa ah mid dabakhaysa qorshayaasha waxqabad ee hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland sannadka 2022.

## Ujeeddooyinka Istaraatiijiga ah ee Hay'adda

1- In la horumariyo Awoodda Maamulka iyo Maaliyadda Hay'adda, (Management and financial capacity building) iyadoo lagu dhaqmayo qiyamka hufnaanta, isla xisaabtanka iyo daahfurnaanta hay'adda.
2- In la horumariyo Awoodda Hay'adda ee Farsamada dhismaha iyo sahanka waddooyinka Puntland (Technical Capacity Building) Iyadoo kor loo qaadyo Awoodda Dayactirka, Dhismaha, Naqshadaynta, Sahanka iyo Shaybaarka.
3- Horumarinta, Dayactirka jidadka laamiga, kuwa Jidcadaha ah ee Puntland, iyo kor u qaadida awoodda Maamulka Qandaraasyada Hay'adda PHA.
4- In la xoojiyo Xiriirka Hay'adda PHA ay la lahayd Hay'adda Caalamiga, Deeq bixiyaasha, Dowladda iyo Dadweynaha, lana dhiso sumcadda Hay'adda.

## Waxqabadka Hay'adda Bilaha June, July, August, iyo September

Hay'adda Dayactirka iyo Hormarinta Waddooyinka Dowladda Puntland iyadoo gudanaysa waajibaadkeeda sharciga ah, waxay qabatay shaqooyin isugu jira Dayactir, Dhisme iyo Tayayn mudada u dhaxaysay bilaha (June, July, August, iyo September) ee sannadka. Sida aan ku faa-faahin doono shaxda hoose dhammaan Shaqooyinkaas waxay noogu qabsoomeen sidii loogu talagalay, waxaana lagu guulaystay in la gaaro dhammaan qorshayaashii daganaa.

## 1. Kor u qaadida Awoodda Maamulka iyo Maaliyadda

Hay'addu iyadoo ka duulaysa Qorshayaasheeda waxay hormarin, ku samaysay qaybaha maamulka iyo Maaliyadda iyadoo laga duulayo halbeegyada Qorshaysnaa sannadkan kuwaasoo loo qaybiyay Bille iyo Asbuuc-le.

## 1.1 Waxaan dib u habayn ku samaynay qaab dhismeedka hay'adda

Waxaa dib u habayn lagu sameeyay Qaab-dhismeedka hay'adda, waxaana la tayeeyay dhammaan waaxyaha PHA, iyadoo sidoo kale la daadajiyay dhammaan shaqooyinka




## 1.2 Dajinta Qorshayaasha Hay'adda

Waxaa la diyaariyay dhammaan Qorshayaasha hay'adda kuwaasoo loo qaybiyay dhammaan Waaxyaha PHA, iyadoo sidoo kale waax walba la siiyay qorshayaashii ay ku howlgali lahayd bil walba, taasoo laga soo min guuriyay qorshaha 3-da sano ee PHA.




## 1.3 Dhismaha Systemyada maamulka iyo maaliyadda

Mudada u dhaxaysay labada kalfadhi waxaa la dhisay sidoo kalena la dhaqan galiyay Dhammaan Systemyada ay ku shaqeeyaan Waaxyaha iyo habka maamulka Maaliyadda.

Hay'adda Wadooyinka DPL — PHA — Puntland Highway Authority

**Monthly Activities Progress Report**

**August 2022** **Date: 03/09/2022**

Table 1. Last Week of July

| NO | Departments/Unit/Office | Planned tasks | | Achieved tasks | | Tasks in progress | | Not achieved tasks | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | #Number | %Percentage | #Number | %Percentage | #Number | %Percentage | #Number | %Percentage |
| 1 | Admin & Finance | 6 | 100% | 5 | 83.33% | | | 1 | 16.66% |
| 2 | HRM | 4 | 100% | 3 | 75% | 1 | 25% | | |
| 3 | Planning and M&E | 4 | 100% | 2 | 50% | 2 | 50% | | |
| 4 | Project management | 6 | 100% | 4 | 66.66% | 2 | 33.33% | | |
| 5 | Maintenance & Rehabilitation | 3 | 100% | 2 | 66.66% | 1 | 33.33% | | |
| 6 | Road Safety | 2 | 100% | 2 | 100% | | | | |
| 7 | Road planning & Engineering | 4 | 100% | 3 | 75% | 1 | 25% | | |
| 8 | Material testing, Quality & Standers | 19 | 100% | 19 | 100% | | | | |
| 9 | Communication Unit | 7 | 100% | 4 | 57.14% | 2 | 28.57% | 1 | 14.28% |
| 10 | Lead Engineer | 14 | 100% | 11 | 78.57% | 1 | 7.14% | 2 | 14.28% |
| 11 | General Secretory Office | 8 | 100% | 5 | 62.5% | 1 | 12.5% | 2 | 25% |
| **Total Activities** | | **77** | **100%** | **60** | **77.92%** | **11** | **14.28%** | **6** | **7.79%** |

**NB.** ***Table 1.*** Indicates last week of July progress report for all departments, units, lead engineer and general secretory, these details present planned tasks, achieved tasks, progress tasks, and not achieved tasks. Each department have percentage and numbers based on the status of their planned activities.

At the end raw shows the total planned activities on that week which was 77(100%) activities, and total achieved tasks was 60(77.92%) activities, also 11(14.28%) activities was on progress, while 6(7.79%) activities was not achieved.

## 1.4 Tayada Maamulka

Si hay’addu uga dhabbayso Qorshaha Istaraatijiyadda hay’adda ee saddexda sano, waxay kor u qaaday islamarkaana tayaysay qaybaha maamulka iyo maaliyadda iyadoo u dajisay nidaamyo shaqo, sidoo kale dhistay habab lagu maamulayo Dhaqaalaha.



## 1.5 Dhismaha Habka Shaqada iyo Shaqaalaha

Waxaa markii ugu horaysay hay’addu yeelatay System lagu kaydinayo xogta shaqaalaha hay’adda Waddooyinka Dowladda Puntland. Habkan ayaa sidoo kale lagu uruuriyay dhammaaan xogta Shaqaalaha.



## 1.6 Dhismaha Habka Maamulka Hantida Hay’adda

Hay’addu waxay ku guulaysatay inay samayso siyaasadda maamulka Hantida Hay’adda taasoo isugu jirta Gaadiid iyo Dhismayaal. Waxaa sidoo kale la tirakoobay hantida hay’adda.



## 1.4 Dhismaha Xafiisyada Iibka iyo Khasnajiga

Hay'addu waxay yelatay labo xafiis oo qayb ka ahaa qorshayaashii horey loo dajiyay kuwasoo kala ah; Xafiiska Iibka iyo Khasnajiga hay'adda.

Mudada labada Kalfadhi u dhaxeeyay waxaa loo sameeyay xafiisyadaas qorshayaashoodii shaqo, iyo dhammaan agabyadii ay ku howlgali lahaayeen.



## 1.5 Habka Kaydinta Xogaha hay'adda

Hay'adda PHA ayaa markii ugu horaysay yeelatay nidaam cusub oo lagu kaydinayo xogta hay'adda ee la xariirtay siyaasadaha, maamulka, farsamada  iyo dhammaan Hab-raacyada Shaqada.

Xogtaas oo markii hore ku qornayd Buugaag ayaa loo badalay electoronic, waxaana lagu kaydiyay servers ay leedahya PHA

## 1.6 Shaqo Qeexis

Shaqooyinka Waaxyaha iyo Shaqaalaha ayaa markii ugu horaysay la kala xadeeyay, waxaana lagu guulaystay in kabada 40 shaqaale ah loo sameeyo Shaqo qeexis, halka dhammaan 7-da waaxyood ee maamulka iyo Farsamada iyo fulinta loo sameeyay TOR.




## 1.8 Dhismaha Quick Book

Hay'adda PHA ayaa sidoo kale u guurtay nidaamka xisaabaadka casriga ah ee Quick Book, si loogu kaydiyo xogta xisaabaadka hay'adda. Nidaamkan ayaa lagu tababaray shaqaalaha maamulka iyo maaliyadda hay'adda iyadoo sidoo kale bil kasta la daabaco xogta maaliyadeed ee PHA iyadoo daah-furan.



## 1.9 Dayactirka Goobaha Shaqada



Waxaa Dayactir lagu sameeyay Xafiisyada xarunta dhexe ee hay'adda, kuwaasoo aan muddo helin wax dayactir ah, waxayna kamid ahaayeen qorshayaasha hay'adda. Meelaha sida gaarka ah loo hagaajiyay waxaa kamid ah; Xafiiska Guddoomiyaha, Xafiiska Injineerada, Xafiiska Hubinta Tayada iyo Ciid-baarka, Xafiiska Xisaabaadka, Hoolka Shirarka, Xarunta Dayrka dhexe ee xarunta, Wajahada hore ee hay'adda. Waxaa sidoo kale Dayactir lagu sameeyay dhammaan agabyada xafiisyada; sida Miisaska, Kuraasta, Armaajooyinka, Computerada, Qalabka Sahanka, iyo Qalabka Ciid-baarka.







## 1.10 Dayactirka Gaadiidka

Waxaa Dayactir lagu sameeyay Gaadiidka Birta Culus ee hay'adda iyo kuwa Safarrada. Waxaa la dayactiray in kabadan 10 gaari oo isugu jira kuwa yar-yar iyo kuwa birta culus.



## Tababarrada Shaqaalaha

Tayaynta Shaqaaluhu waxay kamid ahayd tiirarka Qorshaysnaa in hormarin lagu sameeyo, si looga miro dhaliyo shaqooyinka baaxadda leh ee horyaalla hay'adda. Mudada u dhaxaysay labada Kalfadhi ee Barlamanka waxaanu qabanay Tababaro ku saabsan dhinaca Maamulka, Xiriirka, Tiknoolajiyadda, Injineerinka iyo Hab dhaqanka goobta Shaqada.





## 1.11. Tababar ku saabsan Hogaaminta (Leadership)

30 kamid ah Shaqaalaha hay'adda ayaa loo qabtay Tababar soconayay muddo shan maalmood ah oo lagu baranayay duruus la xariirta Maamulka, Hogaaminta, Xiriirka, uruurinta xogaha iyo hab-dhaqanka goobaha Shaqada. Tababarkaas waxaa bixiyay khabiir shahaadada Digtoorka ka haysta culuumta maamulka.



## 1.12. Tababar ku saabsan Xiriirka iyo Tiknoolajiyadda (IT and Communication)

35 kamid ah Shaqaalaha hay'adda ayaa la siiyay Tababar soconayay 5 maalmood oo ku saabsan barashada cilmiga Tiknoolajiiyadda iyo Xiriirka (Communication)



## 1.13. Tababar ku saabsan Habka Maamulka Mashaariicda

Qaybaha kala duwan ee howl-wadeenada hay'adda ayaa lagu tababaray Casharo la xariira kor u qaadida aqoonta maaraynta mashaariicda.



# 2. Hormarinta Qaybaha Farsamada, Sahanka iyo Dhismaha

Qaybaha farmada, Sahanka iyo dhismaha hay'adda Waddooyinka Puntland, waxaa lagu sameeyay Tayayn isugu jirta dhinaca qalabka, Nidaamyada shaqada iyo Aqoonta Xirfadlayaasha ka shaqeeya Waaxahaas

## 2.1 Hormarinta Habka Maamulka Dayactirka



Waxaa la hormariyay dhammaan qaybta maamulka Dayactirka iyadoo tababar loo sameeyay Injineerada ka shaqeeya qaybaha Mashaariicda iyo Dayactirka. Tababarrada ugu muhiimsan ee ay qaateen waxa kamid ah 'Pavement Maintenance Management and Pavement Condition Index (PCI), habka diyaarinta Qoraaladda iyo Habka hubinta Tayada.

## 2.2 Hormarinta Qaybta Injineerin-ka Hay'adda



Hay,adda waxay qabatay tababaro sare loogu qaadayo tayada waaxyaha kala duwan ee enjineerada,  si looga miro dhaliyo tayada mashaariicda dhismayaasha wadooyinka. Waxaa la tayeeyay Qalanbka shaqaalaha ka shaqeeya iyadoo sidoo kale la siiyay tababaro la xariira mas'uuliyadaha Saaran qaybaha Injineerin-ka hay'adda

## 2.3 Dayactirka Qalabka Sahan



Waxaa dayactir lagu sameeyay qalabka Sahanka hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland, gaar ahaan RTK-ga iyo Total Station-ka, waxaa sidoo kale la qalabeeyay xafiisyada waaxda Sahanka iyo Naqshadaynta.

## 1.14 Tababar ku saabsan Baarista Ciidda

15 kamid ah Injineerada hay'adda Waddooyinka DPL, ayaa ka qaybgalay Tababar ku saabsan habka barista Casriga ee ciiddaha, waxaana tababarkaasi bixiyay Khabiir Kenyaati ah, kaasoo leh khibrad kabadan 8 sano.



# 3. Horumarinta, Dayactirka jidadka laamiga iyo kuwa jidcadaha ah ee Puntland, iyo kor u qaadida awoodda Maamulka qandraasyada Hay'adda PHA.

Hay'adda Hormarinta Jidadka Puntland, waxay ku guulaysatay inay fuliso mashaariic isugu jira Dayactir, Hormarinta, Dhismayaal iyo Sahan lagu sameeyay Jidad Cusub. Shaxda Hoose waxaan ku faah-faahin doonaa Mashaariicda Jidadka ee ka socda Gudaha Puntland, Qiimaha Maalgalintooda, Cidda fulinaysa iyo halka ay marayaan.

## 3.1 Mashruuca Dhismaha wadada laacdheere-Rabaable

Mashruuca dhismaha wadada Laacdheere-Rabaable waxaa la saxiixay January 06,2022, wuxuuna mashruucu marayaa meel gabo gabo ku dhaw, ayadoo tayada dhismaha wadada la ilaaliyey, waxaana gacanta ku haysa Shirkadda Kebarco.



**Magaca: Laac-dheere Rabaable**

**Gobolka: Nugal**

**Cabirka: 14km**

**Qiimaha: $2,100,000**

**Shirkadda: Kebarco**

**Xaaladda Boqollayda: %68**

## 3.2 Mashruuca dhismaah wadada-Xaarxaar

Waxaa meel wanaagsan maraya dhismaha wadada goolada Xaarxaar, iyadoo daamurkii lasaaray masaafo dhan 8.5km. Sidoo kale Waxaa carakaawadii loo dhammeeyay labadii 'layer' ba

Waaxda shaybaarka Hay'adda Wadooyinka Puntland waxay tijaabisay tayada iyo garaacidda ciidda dhismaha (Quality Control and Compaction Test)

Shirkadda wadaniga ah ee ISXILQAAN ayaa dhismaha wadada gacanta ku haysa.

**Magaca: Burtinle-Xaarxaar**

**Gobolka: Nugal**

**Cabirka: 10km**

**Qiimaha: $1,547,500**

**Shirkadda: Isxil-qaan**

**Xaaladda Boqollayda: %53.3**



## 3.3. Mashruuca Dhismaha wadada Xaaji khayr- Dalsan



Mashruucaan oo ah dhisme iyo dayactir wadada Xaaji khayre ayaa gabo gabo ku dhaw. Waxaa illaa hadda la dayactiray buundooyin iyo garbaha wadada oo go.ay. Waxaa dhisme lagu sameeyo buundooyinkii (culverts) go'ay iyo garbihii laamiga oo dhamaaday

**Magaca: Xaaji-khayr Dalsan**

**Gobolka: Nugal**

**Cabirka: 2.17km**

**Qiimaha: $299,500**

**Shirkadda: Al-bashid**

## 3.4. Mashruuca Dhisamaha Wadada Bursaalax-Gaalkacyo



Mashruuca dhismaha wadada Bursaalax-Gaalkacyo waxaana la dhisay 10km, iyadoo Qorshuhu yahay in wajiga koowaad la dhiso ilaa Bayra oo ah 24km.

50% kharashka waxaa bixinaysa Bulshada Bursalax, halka PHA Daboolayso 50%.

**Magaca: Bursalax-Galkacyo**

**Gobolka: Mudug**

**Cabirka: 24km**

**Qiimaha: $288**

**Hay'adda: PHA**

**Xaaladda Boqollayda: %60**

## 3.5. Mashruuca Dhismaha wadada Lafo-goroyo

Mashruucaan oo ah dhismaha wadada Lafo-goroyo oo dhawaan la dhagax-dhigay ayaa shaqadeedii bilaabatay, waxaana sifiican u socda shaqada dhismaha Jidka.




**Magaca: Lafagoroyo**

**Gobolka: Gardafuu**

**Cabirka: 26km**

**Qiimaha: $680,000**

**Shirkadda: Neksom**

**Xaaladda Boqollayda: %10**

## 3.6. Mashruuca dhismaha wadada Sheerbi-Dhahar-XIngalool



Madaxeynaha Dawladda Puntland Mudane, Said Abdullahi Dani ayaa dhawaan dhagax dhigay dhismaha mashruuca wadada isku xirta Sheerbi, Dhahar iyo Xingalool, waxaana dhawaan la bilaabay dhismaha wadada.

**Magaca: Sherbi-Dhahar**

**Gobolka: Sanaag**

**Cabirka: 53km**

## 3.7 Mashruuca Sahanka wadada Wadaagsin



Hay'adda Wadooyinka Puntland ayaa xogta sahanka (Survey data) ka samaysay wadada wadaagsin inta u dhexaysa tuulada Mareer illaa Garacad masaafo dhan 28km, iyadoo la isticmaalaya Qalabka casriga ah ee RTK.

Ujeedada xog uruurintaan ayaa ah sidii loo 'design' garayn lahaa dhismaha wadada Garacad, Galkacyo iyo Galdogob, taas oo dhawaan la bilaabi doono.

## 3.8 Mashruuca Sahanka wadada Garoowe-Garacad




Ha,addu waxay sahan ku saabsan u kuurgelidda xaaladda wadada ku samaysay jidka Garowe-Garacad kaasoo la qorshaynayo in dhawaan shaqadiisu bilaabato. Sido kale waxaa la calaamadiyey Meesha ugu haboon ee wadadu ay mari lahayd iyadoo la geliyey aaladda GPs ka.

## 3.9 Mashruuca Dayactir Wadada Garoowe-Sinujiif




Mashruucaan ayaa lagu dayactiray jidka u dhexeeya Garowe iyo Sinujiif ee gobolka Nugaal.

**Magaca: Garowe-Sinujiif**

**Gobolka: Nugal**

**Qiimaha: $1,650,000**

**Shirkadda: Albashid**

**Xaaladda Boqollayda: 100%**

## 3.10. Mashruuca Dayactirka Xaajikhayr 2

Hay'addu waxay dayactir balaaran ku samaysay wadada Xaaji khayr ayadoo dayactir lagu sameeyey garbaha Laamiga oo go'ay iyo buundooyinka duugoobay. Mashruucan waxaa lagu dayactiray 6 biyo mareen (Culvert) iyo 6 biyo mareen cusub.

**Magaca: Dangorayo - Xajikhayr**

**Gobolka: Nugal**

**Cabirka: 1.2km**

**Qiimaha: $85,919**

**Shirkadda: Albashid**

**Xaaladda Boqollayda: 100%**




## 3.12. Mashruuca Dayactirka Xaaji-Khayr 1

Waxaa dayactir lagu sameeyey jidka dheer ee laamiga ah gaar ahaan inta u dhexaysa tuulada Xaajikhayr iyo Qardho.

**Magaca: Xajikhayr**

**Gobolka: Nugal**

**Cabirka: 500m**

**Qiimaha: $220,000**

**Shirkadda: Albashid**

**Xaaladda Boqollayda: 100%**



## 3.15. Mashruuca Dayactirka Waddada Rabaable-Birtadheer



Hay,addu waxay dayactir ku samaysay jidka laamiga ah ee u dhexeeya Rabaable iyo Birtadheer. Masaafo dhan 20km. Waaxda Dayactirka PHA, ayaa mashruucaas fulisay, waxaana lagu buuxinyay Gododka jidka ka samaysmay.

**Magaca: Rabaable-Birtadheer**

**Gobolka: Nugal**

**Hay'adda: PHA**

**Xaaladda: 100%**

## 3.16. Mashruuca Dayacatirka Wadada Xarfo-Bacaadweyn



Hay,adda ayaa dayactir ku samaysay jidka laamiga ah ee u dhaxeeya Degmada Xarfo iyo degsiimada Bacaadweyn ee gobolka Mudug masaafo dhan 17km. Waaxda Dayactirka hay'adda Waddooyinka Puntland ayaa ka fuliyay mashruuca oo lagu dayactirayay godod ka dhex samaysmay jidka.

**Magaca: Rabaable-Birtadheer**

**Gobolka: Nugal**

**Hay'adda: PHA**

**Xaaladda: 100%**

## Maamulka Kormeerka iyo Dabagalka Mashaariicda

Hay'addu waxay xoojisay labada qaybood ee ah maamulka, kormeerka iyo dabagalka Mashaariicda Dayactirka iyo dhismayaasha Waddooyinka Puntland. Qaybtan hay'addu waxay ka qabatay labo arrimood oo kala ah; Tayaynta Shaqaalaha iyo Qalabka Kormeerka Shaqada iyo dajinta Siyaasadaha Maamulka Mashaariicda.

## 3.17. Habka Maamulka Mashaariicda



Hay'addu waxay tayaysay waaxda Mashaariicda PHA, waxaa loo qaatay shaqaale isugu jira Injineero jooga goobaha shaqada iyo xubno isku xira shaqada ka socota xafiiska iyo midda ka socota xurmaha ay ka socdaa shaqooyinku.

## 3.18. Kormeerka iyo dabagalka Mashaariicda



Waaxda Mashaariicda hay'adda oo kaashanaysa xafiiska CEO ayaa bil kasta soo saara warbixinta bilaha ah ee hay'adda iyagoo kormeer ku tagaya goobaha shaqada sidoo kalana uruurinaya xogta maalinlaha ah ee ka yimaada shaqaalaha jooga goobaha Mashaariicda

## 3.19. Hubinta Tayada Mashaariicda



Hay'addu waxay xoogga saartay hubinta tayada Mashaariicda jidadka ee ka socda gobollada Puntland. Waxaa la shaqaalaysiiyay Injineero isugu jira Ajnabi iyo Soomali kuwaasoo si wadajir ah uga shaqaynayay in dhammaan heshiisiyada ku qoran mashaariicda loo raacay sidii loogu talagalay.

## 3.20. Tayaynta Shaybaarka Hay'adda



PUNTLAND HIGHWAY AUTHORITY

PUNTLAND HIGHWAY AUTHORITY TESTS SUMMARY (JUNE - OCTOBER)

| | | TESTS | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| NO. | PROJECTS | PROCTOR | ATTERBERG LIMITS | SIEVE ANALYSIS | FIELD DENSITY | CBR | DCP | Inspection/Assessment Reports | TEST REPORTS |
| 1 | RABAABLE - LACTHUTBE ROAD | 1 | 0 | 0 | 43 | 0 | 0 | 1 (Asphalt) | 8 |
| 2 | MEDGAN KHAJI KHAYIR ROAD PROJECT | 0 | 0 | 0 | 0 | 0 | 0 | 1 (surface dressing) | 0 |
| 3 | KARKAAR ARDAASONA | 1 | 1 | 1 | 0 | 0 | 0 | 0 | 1 |
| 4 | BAYRA | 1 | 1 | 1 | 0 | 0 | 0 | 0 | 1 |
| 5 | DARAYL | 1 | 1 | 1 | 0 | 0 | 0 | 0 | 1 |
| 6 | BURSALAN - GALKAYO | 3 | 3 | 3 | 5 | 0 | 0 | 0 | 4 |
| 7 | SHEERBI - DHAHAR PROJECT | 4 | 4 | 4 | 0 | 4 | 0 | 0 | 1 |
| 8 | DHAHAR - XINGALOL PROJECT | 4 | 4 | 4 | 0 | 0 | 0 | 0 | 1 |
| 9 | ROAD REHABILIT. NEAR DALSAN VILLAGE | 2 | 2 | 2 | 8 | 0 | 14 | 1 (culverts/metal pipe) | 3 |
| No of Tests | | 17 | 16 | 16 | 56 | 4 | 14 | 3 | 20 |

Hay'addu waxay Tayaysan Waaxda Shaybaarka Ciidaha iyo Shaqaalahooda. Waxaa la qalabeeyay xafiiska Ciid-baarka.

Qaybtan waxay Baaritaan ku samaysay **123 ciidood** Mudadii u dhaxaysay May-October, waxaana laga qoray 23 report Dhammaan 9 Mashruuc ee hadda hay'addu gacanta ku hayso.

## 4. Xoojinta Xiriirka Hay'adda ee Daneeyaasha, Dowladda iyo Dadweynaha

Hay'adda Waddooyinka Puntland waxay xiriir soo jireen ah la lahayd waqti dheer dhinacyada ay kala dhaxayso wada-shaqaynta, balse muddooyinkii dambe waxaa lumay xiriirkaas. Waxaan dedaal ku bixinay sidii loo wanaajin lahaa macaamilka dhinacyada ay wada shaqayntu naga dhaxayso anago diiradda saarnay arrimahaan

### 4.1. Samaynta Website-ka Hay'adda

Waxaan dib hawada u galinay Website-ka hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland [https://pha.pl.so](https://pha.pl.so)

Webka, waxaa si joogto ah loogu baahiyaa xogaha hay'adda ee u baahan daabacaadda.




### 4.2. Dhismaha Baraha Bulshada

Waxaa sidoo kale la sameeyay baraha Bulshada ee laguwada xariiro gaar ahaan **[Facebook](#)** iyo **[Twitter](#)**, kuwaasoo iyaguna qayb ka ahaan meelaha aan kula xariirno dadweynaha iyo daneeyaasha hay'adda






### 4.3 Isticmaalka Warbaahinta Gudaha



Hay'addu waxay si joogto ah u isticmaashaa warbaahinta gudaha si ay u baahiyaan shaqooyinka dowladda ee la xariira arrimaha dhismaha Jidadka. Waxaa si joogto ah loo baahiyaa xogaha la xariira wacyigalinta, fariimaha iyo shaqooyinka baahinta u baahan.

### 4.4 Kor u qaadida xiriirka Daneeyayaasha kala duwan



Hay'addu waxay sare u qaaday xiriirada kala duwan ee daneeyayaahsa, sida dawladda, Ganacsatada, bulshadda qaybeheeda kala duwan iyo Hay'adda caalamiga ah, iyo kuwa maxaliga ah, si loo xoojiyo wada shaqaynta xagga hormarinta mashaariicda wadooyinka Puntland

## Hirgelinta Qorshaha Istiraatiijiga ah ee Saddexda Sano

Hay,addu waxay hirgelisay qorshaha istiraatiijiga ah ee sadexda sano, kaas oo madaxeynaha dawladda mudane, Sicid Cabdullahi Deni daahfuray, dhamaadk ii bishii Luulyo, 2022, wuxuuna madaxweynu ku yaboohay lacag dhan $30,000,000, in ay dawladdu uga qabqaadanayso mashaariicda hormarinta wadooyinka Puntland.




## 7. Gabo-gabo

Guud ahaan waxaa intaas ku dhammaystiran warbixinta Afarta bilood oo aan xoogga ku saarnay waxyaabihii ka qabsoomay shaqooyinkii Qorshaynaa sannadkan. Waxqabka hay'adda waxaa mar kasta bud-dhig u ahaa Qorshaha Istaraatiijiyadda hay'adda ee Saddex-da sano, kaasoo loo jajabiyay Sannad-le, Bil-le iyo Asbuuc-le.